



Shaqooyinka wakiilka

Yaa heli kara qof wakiil ah

Qofka xaaladdiisa caafimaad awgeed, u baahan in laga caawiyo maareynta dhaqaalihiiisa iyo ilaalinta danihiisa waxaa laga yaabaa in uu xaq u leeyahay in uu caawinaad ka helo qof wakiil ah. Shaqadu waa shaqo iskaa wax u qabso ah, taas oo macnaheedu yahay in qofka wakiilka ahi aanu shaqaale ka ahayn degmada, laakiin shaqada ayaa loo fuliyaa si iskaa ah wax u qabso ah. Qofka wakiilka ahi waxa uu xaq u leeyahay lacag gunno ah oo uu ku helo shaqadiisa. Sida caadiga ah, waa la caawiyaha, micnaha qofka caawimaad ka helaya qofka wakiilka ah oo bixinaya kharashka.

Maxaa ka mid ah shaqooyinka qofka wakiilka ah

Shaqada qofka wakiilka ah waa in qaab caawinaadiisa waafajiyaa baahida qofka ee la caawinaaya. Wakiilnimada waxa ka mid noqon kara ilaalinta xaqa, maaraynta hantida iyo/ama daryeelka qofka.

Maaraynta hantida

Tusaalooyinka hawlaha kamidka ah maaraynta hantida:

- Bixinta biilasha.
- Ku wareejinta lacagta jeebka/lacagta gaarka ah la caawiyaha ama qofka xidhiidhiyaha u ah ee jooga guriga.
- Hubinta in lacagta jeebka ee la caawiyaha ay ku baxdo si sax ah iyada oo la adeegsanaayo buugga qasnadda ama rasiidhada ka yimaada degaanka.
- Maaraynta kaydada la caawiyaha iyo in meel loo dhigo raasamaal kayd ah haddii loo baahdo.

Ilaalinta xaqa

Tusaalooyinka hawlaha kamidka ah ilaalinta xaqa:

- La xiriiridda hay'adaha dowliga ah.
- U dalbidda deeqaha iyo tabarucaadka oo uu la caawiyaha xaq u yeelan karo.
- Dib u eegista heshiisyada sida caymiska guriga iyo rukumada taleefoonka gacanta.
- Wakiil ka noqoshada la caawiyaha, tusaale ahaan, dhaxalka iyo iibinta guryaha.
- Rafcaan ka qaadashada go'aamada hay'adaha dowliga.
- Codsiga deyn cafinta.



ÖVERFÖRMYNDARE
I SAMVERKAN

HÄRRYDA • KUNGSBACKA • MÖLNDAL • PARTILLE • ÖCKERÖ

Daryeelka qofka

Tusaalooyinka hawlaha kamidka ah Daryeelka qofka:

- Hubinta in la caawiyuhu leeyahay xaalad nololeed oo wanaagsan iyo madax-bannaanida ugu weyn ee ugu suurto galsan.
- Hubinta in caawimada bulshadu ka timaado ay shaqeyso.
- La socoshada danaha gaarka ah ee la caawiyaha ee la xariirta, tusaale ahaan, hawlo maalmeedka, guriyeynta, wakhtiga firaaqada iyo daryeelka caafimaadka.

Maxaa aanu ku jirin shaqooyinka qofka wakiilka ah

Qofka wakiilka ahi waa in aanu u fulin hawlo wax ku ool ah oo uu u qabanayo la caawiyaha, balse waa in uu ahaado isku-duwe si hindisaha ku xeeran la caawiyuhu u shaqeeyaan oo ay sax u noqdaan.

Tusaalooyin shaqooyinka aan kujirin:

- U soo adeegidda la caawiyaha.
- In loo sameeyo dalxiisyo qofka la caawinaaya.
- U kaxaynta la caawiyaha goobaha caafimaadka ee kala duwan ama daawo u keenista.
- Ku dhejinta daahyada ama hawlaha la midka ah ee guriga dhexdiisa.
- Xusuusinta shirarka.